# Ka Gaaridda Heshiis Baahida loo qabo Adeegyada Soo-kabashada shakhsiyeed ee




Ikhtiyaarrada hoose waxaa loogu talagalay inay sharxaan sida habka go'aan-u-qaadashada ee Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyadeed ee COVID-19 ay uga shaqeyn karaan heer degmo illaa iyo oo ay ku jirto gargaar heer-gobol ah. In kasta oo degmo dugsiyeedyada, waalidiinta (iyo carruurta qaangaarka ah, sida ay khuseyso), iyo kooxaha IEP ay isticmaali karaan hal ama in ka badan hababka soo socda ee lagu gaarayo heshiis ku saabsan Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyadeed ee COVID-19, ODE waxay ku dhiirrigelinaysaa degmo-dugsiyeedyada iyo waalidiinta inay si iskaashi leh iskula shaqeeyaan si ay ula aqoonsadaan kooxdu ugu dhow ardayga, iyagoo raadinaya taageero dheeri ah haddii howlahaas aan lagu guuleysan. Ikhtiyaarradan waxaa loo bixiyaa ujeeddooyin sharaxaad sawir leh oo keliya. Degmo dugsiyeedyada iyo waalidiintu waa inay la tashadaan la-taliyahooda sharciyeed ee khuseeya u hoggaansanaanta sharciyada gobolka iyo federaalka.

***Xulashada A: Taageerada Dhamaan Ardayda***

Arday kasta waxaa uga dhiman casharo sanad dugsiyeedka 2020-21. Dhamaan ardayda waa in la taageeraa markay soo noqonayaan sanad dugsiyeedka 2021-22. In kasta oo baahida loo qabo Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19 aan la awoodi karin in si buuxda loo cabbiro illaa laga bilaabo dib-u-bilaabidda barashada fool-ka-foolka ah ee dugsiga, haddana degmo dugsiyeedyada lagama mamnuuco inay bixiyaan Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19 iyada oo loo marayo fursadaha barashada onlayna ah iyo/ama isku-dhafka iyo/ama barnaamijka xagaaga. Intaas kadib, degmo dugsiyeedyadu waxay u baahan doonaan qorshe lagu bixiyo taageerada loo baahan yahay

ee loogu talagalay dhammaan ardayda aan dhamaysanin casharadooda . Ardayda ay la soo gudboonaato naafonimo waa in loo oggolaadaa inay ka faa'iideystaan isla qorshooyinkaas, iyadoo ardayda qaar ee la kulma naafonimo,

qorshayaashani ay siin karto taageero ku habboon. Si kastaba ha noqotee, ardayda qaar ee laxaadka la' waxay u baahan karaan taageero dheeraad ah.

Mas'uuliyadaha Degmada Dugsiga ee Xulashada A:

- Degmadu waxay go'aamisaa baahida ardayga in la buuxiyay iyadoo adeegyada iyo taageerooyinka la bixiyo si ay awood ugu siiso arday kasta inuu si guul leh ugu laabto waxbarashadiisa.
    - Markii go'aan laga gaaro halkaan in taageerada guud ee waxbarashada iyo taakuleynta waxbarashada gaarka ah ee hadda jirta ee ku jira IEP **ay** ku filan tahay in la daboolo baahiyaha ardayga naafonimo qaba, degmo dugsiyeedyadu waa inay siiyaan waalidiinta ogeysiis qoraal ah oo hore oo go'aankaas ah iyadoo la adeegsanayo [tusaalaha Foonka dib-u-eegsta Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID- 19](#) ama foomka ay soo saartay degmo-dugsiyeedka oo ka kooban isla wixii la mid ah wixii looga baahdo OAR 581-015-2228 (6).
    - Marka go'aan laga gaaro halkaan in taageerada waxbarashada guud iyo taageerada waxbarashada khaaska ah ee hadda jirta ee ku jira IEP **aynan ku** filnayn inay daboosho baahiyaha ardayga naafada ah, degmo dugsiyeedyadu waa inay isugu yeeraan kooxda IEP. Waqtiga loo baahan yahay in la qabto shirarka IEP ee loo qabtay ujeedkan waa in lagu sameeyaa iskaashi
    lala yeesho waalidiinta iyadoo la tixgelinayo duruufaha ilmaha. Ogeysiiska kulanka IEP waa in la bixiyaa waqti hore si loo hubiyo in waalidku haysto fursad uu kaga qayb galo.
- Haddii waalidku uusan ku raacsaneyn go'aanka degmo dugsiyeed ee lagu gaaray tallaabadan, degma dugsiyeedku waa inay wax ka qabataa walwalka waalidka iyada oo loo marayo nidaamka IEP.

Xuquuqda Waalidka / Ardayga iyo Mas'uuliyadaha Xulashada A:

- Waalidiinta iyo ardayda qaangaarka ah waxay xaq u leeyihiin inay diidaan oo ay ka codsadaan kooxda IEP inay shiraan si ay ugala hadlaan baahida Adeegyada Soo-kabashada ee Shakhsiyeed ee COVID-19.
- Waalidiinta iyo ardayda qaangaarka ah waxay xaq u leeyihiin inay adeegsadaan mid ka mid ah nidaamyadooda dhowrista khilaafaadka xallinta khilaafaadka (tusaale ahaan, dhexdhexaadinta, cabashada gobolka, nidaamka xuquuq dhowrista).

***Xulashada B: Kulanka Kooxda IEP***

Kooxda IEP waa inay wax ka qabtaan xaaladaha ay ka shakiyaan, ama ay jirta sabab looga shakiyo, oo ah in
ardayga ka soo kabashadiisa lagu gaari karin waxbarashada guud iyo taageerada waxbarashada gaarka ah ee ku jirta IEP-ga ay hadda ku jiraan, ama halka ardaygu uusan ka gaarayn horumarka laga filayo. Kooxuhu waa inay shiraan, dib u eegaan xogta ku saabsan horumarka ardayga, go'aanno ku habboon ka gaaraan wixii adeegyo dheeri ah iyo taageeridda cunuggu u baahan yahay si loo soo celiyo wadiiqadoodii waxbarasho iyo in la awoodo FAPE, lana cusbooneysiiyo IEP sida khusaysa.

Mas'uuliyadaha Degmada Dugsiyeedka ee Xulashada A:

- Wax ka qabashada baahida loo qabo Adeegyada Soo-kabashada ee Shakhsiyeed ee COVID-19 iyada oo loo marayo nidaamka IEP. IEPs waa la cusbooneysiin karaa iyadoo aan la gaarin kulan heshiis qoraal ah (34 CFR § 300.324 (4) iyo [OAR 581-015-2225](#) (2) (a)), laakiin laguma talinayo hanaankan. Marka kulammada IEP la qabto si wax looga qabto baahida loo qabo Adeegyada

Soo-kabashada ee Shakhsiyeed ee COVID-19, waqtiga xaddidan waa in lagu go'aamiyaa iyadoo lala kaashanayo waalidiinta iyadoo la tixgelinayo xaaladaha ilmaha.

- Ogeysiiska kulanka IEP waa in la bixiyaa waqti hore si loo hubiyo in waalidku haysto fursad uu kaga qayb galo.
- Ururi xog iyo dukumentiyo khuseeya kahor kulamada IEP si aad ugu wargeliso kooxda IEP go'aankeeda.

- Hubso in waalidiinta ama, sida ay khuseyso, ardayda qaangaarka ah la siiyo fursad ay si macno leh uga qayb galaan hawshan.
- Iyada oo qayb ka ah hannaanka kulanka IEP, degmo dugsiyeedku wuxuu:
    - Si buuxda ugu muujin go'aanada kooxda IEP dukumintiga IEP.
    - Si ku habboon u ogeysiin waalidka ama, sida ay quseyso, ardayga qaangaarka ah ee go'aanka kooxda una siin fursad ay dib ugu eegaan oo ay ugu raacaan ama ugu diidaan go'aanka kooxda IEP iyadoo la adeegsanayo muunadda Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19 Foomka dib-u-eegida ama foomka ay soo diyaarisay degmo-dugsiyeedka oo ka kooban isla waxyaabaha looga baahan yahay OAR 581-015-2228 (6).
        - Haddii waalidku ku raacsan yahay go'aanka, degma dugsiyeedku waa inuu u u hirgeliyaa IEP sidii loo dhisay, la socdaa horumarka ardayga, oo dib u kulmiyaa kooxda IEP haddii/sida ku habboon ay ku xirantahay horumarka ardayga. Kooxda IEP waxay u baahan doontaa inay dib u eegis ku sameyso baahida loo qabo Adeegyada Soo-kabashada ee Shakhsiyeed ee COVID-19 ugu yaraan kulan kasta oo dib-u-eegis sanadle ah illaa sannad dugsiyeedka 2022-23.
        - Haddii waalidku uusan ku raacsaneyn go'aanka, kooxda IEP waxay dib u kulmi karaan iyagoo taageero ka hela fududeeye dhexdhexaad ah.

Xuquuqda Waalidka/Ardayga iyo Mas'uuliyadaha Xulashada B:

- Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay si macno leh uga qaybqaataan geeddi-socodka IEP iyo go'aan kooxeedka ee luuqad ay fahmayaan.
- Waalidiinta iyo ardayda qaangaarka ah waxay xaq u leeyihiin inay diidaan go'aamada kooxda IEP oo ay raadsadaan IEP la Fududeeyay ama ay adeegsadaan mid ka mid ah qaababka xalinta khilaafaadka ee laga heli karo Habraaca Badbaadada.

***Xulashada C: Kulan IEP ee la Fududeeyey***

Marka xaalad adag tahay ama ay suuro gal tahay in khilaaf dhex maro xubnaha kooxda IEP, waalidka ama degmadu waxay waydiisan karaan ODE inay siiyaan dhexdhexaadiye dhexdhexaad ah oo ka qayb gala kulanka IEP. Fududeeyeyaasha IEP waa hageyaal habraac oo dhexdhexaad ah oo ka taageera kooxaha sidii loo gaari lahaa is afgarad inta lagu jiro kulanka IEP. Iyagu maahan go'aan sameeyayaal, xubno ka tirsan kooxda IEP, ama khabiiro ku xeel dheer waxyaabaha ku saabsan. Dano gaar ah kuma lahan natiijada kulanka, marka laga reebo inay hubiyaan in xuquuqda ilmaha la ilaaliyo; dhammaan xubnaha kooxda IEP waxay leeyihiin cod macno leh, talo gelin, iyo kaqeybgal; waxaana la raacayaa go'aan qaadasho sharci ah. Waalidiinta iyo degmooyinku waxay leeyihiin xuquuqdooda si ay u raadsadaan xallinta khilaafaadka rasmiga ah (ie, dhexdhexaadinta, nidaamka xuquuq dhowrista leh, cabashooyinka gobolka) sida ku habboon iyadoon loo eegin haddii ay horay u raadsadeen IEP la Fududeeyay si looga wada hadlo Adeegyada Soo-kabashada ee Shakhsiyeed ee COVID-19.

Mas'uuliyadaha Degma Dugsiyeedka ee Xulashada C:

- Degmo dugsiyeedka ayaa mas'uul ka ah dhammaystirka waraaqo kasta oo looga baahan yahay Waaxda Waxbarashada ee Oregon (ODE) si loo bilaabo hawsha IEP ee la Fududeeyey.
- Degmadu waxay lashaqeyn doontaa waalidka iyo fududeeyaha si loo qorsheeyo kulanka IEP ee la Fududeeyay ee la qabto taariikhda iyo waqtiga la isla ogol yahay.
- Iyada oo qayb ka ah hannaanka kulanka IEP ee la fududeeyay, degmo dugsiyeedku wuxuu:
    - Si buuxda ugu muujin go'aanada kooxda IEP dukumintiga IEP.
    - Si habboon u diiwaangelin go'aanka kooxda iyadoo la adeegsanayo muunadda Foomka

Dib-u-eegista Adeegyada Soo-kabashada ee Shakhsiyeysan ee COVID-19 ama foom ay soo diyaarisay degmo-dugsiyeedka oo ka kooban waxyaabo la mid ah sida loogu baahan yahay OAR 581-015-2228 (6).

- Haddii kulanka IEP-ga ee la Fududeeyey uu horseed u noqdo is-afgarad xubnaha kooxda ee ku saabsan baahida loo qabo Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19, degmo-dugsiyeedku waa inay u hirgeliyaan IEP sidii loo dhisay, ula socdaan horumarka ardayga, oo ay dib ula kulmaan kooxda IEP haddii/sida ugu habboon iyadoo kuxiran horumarka ardayga. Kooxda IEP waxay u baahan doontaa inay dib u eegis ku sameyso baahida loo qabo Adeegyada Soo-kabashada ee Shakhsiyeed ee COVID-19 ugu yaraan kulan kasta oo dib-u-eegis sanadle ah illaa sannad dugsiyeedka 2022-23.
- Haddii la isku afgaran waayo nidaamka IEP ee la fududeeyay, degmadu waa inay ku wargelisaa waalidiinta xuquuqdooda dhowrista nidaamka.

Xuquuqda Waalidka/Ardayga iyo Mas'uuliyadaha Xulashada C:

- Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin inay si macno leh uga qaybqaataan geeddi-socodka IEP iyo go'aan kooxeedka ee luuqad ay fahmayaan.
- Waalidiinta iyo ardayda qaangaarka ah waxay xaq u leeyihiin inay diidaan go'aamada kooxda IEP waxaana laga yaabaa inay adeegsadaan mid ka mid ah hababka xallinta khilaafaadka ee laga heli karo Habraaca Badbaadada.

***Xulashada D: Dhexdhexaadinta***

Dhex-dhexaadintu waa mid ka mid ah xulashooyinka xallinta khilaafaadka ee loo baahan yahay ee IDEA ee loogu talagalay in lagu taageero qoysaska iyo barayaasha ee dhisidda heshiiska. Dhexdhexaadiyayaashu waa kaqeybgalayaal dhexdhexaad ah oo loo tababaray farsamooyinka taageera hal abuurka iyo wada shaqeynta xalinta dhibaatooyinka. Kaqeybgalka dhexdhexaadintu waa bilaash, ikhtiyaari ah, qarsoodi ah, waxaana codsan kara qoyska ama dugsiga degmada. Taariikh ahaan, kaqeybgalayaasha dhexdhexaadintu waxay gaaraan heer aad u saraysa oo heshiis waxayna u arkeen in geedi socodka uu faa'iido u yahay wada shaqeynta socota Maadaama heshiisyada dhex dhexaadinta ay gaaraan kaqeybgalayaasha oo aynan ahayn go'aan qof saddexaad gaara, waxay u noqdaan kuwo lagu qanco oo waara.

Mas'uuliyadaha Degma Dugsiyeedka ee Xulashada D:

- Waalidka ama degma dugsiyeedka ayaa bilaabi kara codsiga dhexdhexaadinta iyaga oo la xiriiraya ODE ama soo gudbinaya foomka Codsiga Dhexdhexaadinta .
- Dhexdhexaadintu waa hawl ikhtiyaari ah; sidaa darteed, degmo dugsiyeedyadu waxay go'aansan karaan inay diidaan ama ka qaybgalaan codsi dhexdhexaadin uu waalidku bilaabay.
- Degma dugsiyeedyadu wuxuu lashaqeyn doonaa ODE (iyo / ama dhexdhexaadiyaha) iyo waalidka si ay usameeyaan kalfadhiga dhex dhexaadinta ee taariikh iyo saacad la isla wadaagi karo.
- Kal-fadhiga dhex-dhexaadinta ka dib, degma dugsiyeedku wuxuu:
  - Si buuxda u muujin doonaa go'aannada la gaadhay ee khuseeya Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19 ee dukumintiga IEP iyo, haddii ay habboon tahay, bixin doonaa sii ogaysiis hore oo qoraal ah.
  - Si habboon u diiwaangelin go'aanka kooxda iyadoo la adeegsanayo muunadda Foomka Dib-u-eegista Adeegyada Soo-kabashada ee Shakhsiyeysan ee COVID-19 ama foom ay soo diyaarisay degmo-dugsiyeedka oo ka kooban waxyaabo la mid ah sida loogu baahan yahay OAR 581-015-2228 (6).
  - Ilaalin sirta doodaha dhexdhexaadinta.

Xuquuqda Waalidka/Ardayga iyo Mas'uuliyadaha Xulashada D:

- Waalidka ama ardayga qaan-gaark aah ayaa bilaabi kara codsiga dhexdhexaadinta iyaga oo la xiriiraya ODE ama soo gudbinaya foomka Codsiga Dhexdhexaadinta.
- Maadaama dhexdhexaadintu tahay nidaam ikhtiyaari ah, waalidiinta ama ardayda qaangaarka ah way diidi karaan ama way ka qayb geli karaan fadhiyada dhexdhexaadinta ee ay degmadu bilowdo.

- Waalidiinta iyo ardayda qaangaarka ah waxay xaq u leeyihiin inay adeegsadaan mid ka mid ah nidaamyadooda dhowrista khilaafaadka xallinta khilaafaadka (tusaale ahaan, dhexdhexaadinta, cabashada gobolka, nidaamka xuquuq dhowrista).

***Xulashada E: Cabashada Gobolka***

Dhisidda is afgarad dhexmara xubnaha kooxda IEP marwalba suurtagal maahan, xitaa iyadoo taageero laga helayo dhinac saddexaad oo dhexdhexaad ah sida fududeeye ama dhexdhexaadiye. Kooxaha aan awoodin inay heshiis ka gaaraan baahida loo qabo Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19, nidaamka cabashada ee qoran ayaa laga yaabaa inuu bixiyo waddo lagu xalliyo. Nidaamka cabashadu wuxuu raacayaa muddo 60 maalmood ah oo adag si loo dhammeeyo baaritaanka, wuxuuna awoodda go'aan-qaadashada ka qaadaa kooxda IEP. Inta lagu jiro baaritaanka cabashada, ODE waxay dib u eegtaa diiwaanada, xogta, iyo macluumaadka ay bixiyeen labada qoyska iyo degmadaba kahor intaan la gaarin go'aanka ugu dambeeya.

Mas'uuliyadaha Degma Dugsiyeedka ee Xulashada E:

- Kajawaabida codsiyada diiwaanada, wareysiyada, iyo macluumaadka kale ee kasocda ODE waqtiga ku haboon.
- U hoggaansanaanta amar kasta oo ficil sixitaan ah oo loo arko inay lagama maarmaan u tahay in lagu xalliyo natiijooyinka ka soo baxa u hoggaansam la'aanta, oo ay ku jiraan amar kasta oo loogu talagalay waxbarashada magdhawga ah.

Xuquuqda Waalidka/Ardayga iyo Mas'uuliyadaha Xulashada E:

- Waalidiinta iyo ardayda qaangaarka ah waxay xaq u leeyihiin inay adeegsadaan mid ka mid ah nidaamyadooda dhowrista khilaafaadka xallinta khilaafaadka (tusaale ahaan, dhexdhexaadinta, cabashada gobolka, nidaamka xuquuq dhowrista).
- Waalidka ama aray qaan0gaar ah ayaa bilaabi kara baaritaan cabasho gobolka iyagoo ODE iyo degma dugsiyeedka u diraya cabasho saxiixan oo taarikhaysan iyagoo cadaynayo, ama sheegaysa, ama ku eedeynaysa, xadgudubka sharciga waxbarashada gaarka ah ee federaalka sanadkii hore gudahiis.
- Waalidiinta iyo ardayda qaangaarka ah waxay xaq u leeyihiin inay isku dayaan inay ku xalliyaan cabashada gobolka ee qoran iyagoo adeegsanaya dhexdhexaadin.

***Xulashada F: Dhageysiga Nidaamka Xuquuq dhawrista***

Nidaamka xuquuq dhowrista leh ayaa u taagan habka rasmiga ah, sharciga, iyo xallinta khilaafaadka adag ee ka jira IDEA. Dhageysiga nidaamka xuquuq dhowrista leh, dhinacyadu waxay fursad u leeyihiin inay soo bandhigaan caddeyn, u yeeraan oo ay su'aalo weydiiyaan markhaatiyaasha, kuna hor marag furaan garsooraha sharciga maamulka. Kaddib marka si taxaddar leh dib loogu eego caddaymaha, garsooraha ayaa soo saari doona amar kama dambays ah. Waalidiintu waxay marin u heli karaan nidaamka xuquuq dhowrista ah iyaga oo aan haysan wakiil sharci; hase yeeshe, qoysaska badankood waxay adeegsan doonaan adeegyada ama qareen ama wakiil aqoon u leh. In kasta oo nidaamka dhageysiga xaqsoorka uu noqon karo habka ugu habboon ee lagu xalliyo khilaafaadka qaarkood ee caqabadaha leh, waxay ku imaan kartaa qiime maaliyadeed, xiriir iyo dareenka shucuureed oo ka soo qayb galayaasha.

Mas'uuliyadaha Degma Dugsiyeedka ee Xulashada F:

- Sii wad dhaqangelinta adeegyada iyo taageerooyinka lagu muujiyey heshiiskii ugu dambeeyay ee ardayga ee IEP.
- Ilaa labada dhinac ay ku heshiiyaan in laga tanaasulo shuruuda, degmadu waa inay ka

qaybgashaa fadhiga xallinta si ay isugu dayaan inay u xalliyaan khilaafka ka hor intaanay u sii amba qaadin dhegeysiga.

- Si ku habboon u diiwaangeli go'aan ka gaarista baahida loo qabo Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19, iyo Adeegyo kasta ee Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19 ee la siiyo waalidka ama ardayga qaangaarka ah, iyadoo la adeegsanayo foomka Dib-u-eegista Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19 ama foom

ay soo diyaarisay degmo dugsiyeedka oo ka kooban isla waxyaabaha looga baahanyahay OAR 581-015- 2228 (6).

Xuquuqda Waalidka/Ardayga iyo Mas'uuliyadaha Xulashada F:

- Waalidiinta ama ardayda qaangaarka ah way isticmaali karaan, laakiin looma baahna inay isticmaalaan, foomka Codsiga Dhageysiga ODE si ay u bilaabaan cabashada nidaamka xuquuq dhowrista.
- Ilaa labada dhinac ay ku heshiiyaan in laga tanaasulo shuruuda, waalidku waa inuu ka qaybgalaa fadhiga xallinta oo ay isku dayaan inay u xalliyaan khilaafka ka hor intaanay u sii amba qaadin dhegeysiga.